


Cafisku (saamaxaaddu)
waa wax weyn!

Forgiveness is
something great!

www.noloshacusub.net
akhbaartawanaagsan.com

Sheekooy, sheeko, sheeko Xariira...

A story, a story,
it's time for a story...



Cafis

Cafisku (saamaxaaddu)

waa wax weyn!

Forgiveness

Forgiveness is something great!

Inaad qof kale

cafiso ma fududa.

Laakiin

in lagu cafiyo

waa culeys weyn

oo kaa degay.

2



To forgive one another is not easy.
But receiving forgiveness can be a big relief.

Butros,

oo xer Ciise ahaa
ayaa is waydiiyay
inay tahay inaad qofka
had iyo goor cafis.

4



Peter, a disciple of Jesus, asked himself
whether you should always forgive.

Waxa uu Ciise weydiyay:

Sayidow,
immisa goor baan
cafiyaa walaalkay
hadduu igu dembaabo?
Ma ilaa toddoba
goor baa?

6



He asked Jesus: 'How many times shall I forgive my brother who sinned against me? Seven times?'

Ciise ayaa ku yidhi:

Kugu odhan maayo,

Ilaa toddoba goor,

laakiin,

Ilaa toddobaatan goor

oo toddoba ah!

—

Kadib wuxuu u sheegay sheeko...

8



Jesus said: 'Not upto seven times,
but up to seventy times seven times!'

And then He told a story...

Sidaa darteed

boqortooyada jannada
waxaa loo ekaysiiyaa
nin boqor ah
oo doonayay
inuu addoommadiisa
ka xisaab qaato.



Therefore, the kingdom of heaven is like a king who wanted to settle accounts with his servants.

Goortuu

bilaabay
inuu xisaab qaato
waxaa loo keenay
nin toban kun
oo talanti
uu ku lahaa.



As he began the settlement,
a man who owed him ten thousand bags of gold
was brought to him.

Laakiin

wuxuu ku bixiyo ma uu haysan.

Markaasaa sayidkii

wuxuu ku amray

in la iibiyo isaga

iyo naagtiisa

iyo carruurtiisa

iyo wuxuu lahaa oo dhan,

oo lagu bixiyo.

14



Since he was not able to pay, the master ordered that he and his wife and his children and all that he had be sold to repay the debt.

Addoonkii

haddaba wuu dhacay,
oo intuu sujuuday,
ayuu wuxuu ku yidhi,
Ii dulqaado,
anna waan wada
bixin doonaaye.



At this the servant fell on his knees before him.

'Be patient with me,' he begged,

'and I will pay back everything.'

Markaasaa

addoonkaas sayidkiisii

u naxariistay,

wuuna sii daayay,

oo amaahdii

wuu u dhaafay.



The servant's master took pity on him,
canceled the debt and let him go.

Laakiin

addoonkaas ayaa baxay
oo helay mid ka mid ah
addoommadii uu la shaqayn jiray,
kii uu ku lahaa boqol dinar.
Wuu qabtay oo intuu ceejiyey
ayuu ku yidhi,
Bixi waxa lagugu leeyahay.



But when that servant went out, he found one of his fellow servants who owed him a hundred silver coins.

He grabbed him and began to choke him.
'Pay back what you owe me!' he demanded.

Addoonkii


uu la shaqayn jiray
ayaa haddaba
cagihisii isku riday oo baryay,
oo ku yidhi,
Ii dulqaado,
anna waan bixin doonaaye.



His fellow servant fell to his knees and begged him,
'Be patient with me, and I will pay it back.'

Isaguse

ma uu doonaynin,
laakiin wuu baxay
oo xabsiga ku tuuray
ilaa uu bixiyo
wixii lagu lahaa.



But he refused. Instead, he went off and had the man
thrown into prison until he could pay the debt.

Haddaba

kuwii la shaqayn jiray,
goortay arkeen wixii dhacay,
aad bay u calool xumaadeen,
oo intay sayidkooda
u yimaadeen,
ayay u sheegeen
wixii dhacay oo dhan.



When the other servants saw what had happened,
they were outraged and went and told their master
everything that had happened.

Markaasaa

sayidkiisii u yeedhay oo ku yidhi,
Addoon yahow sharkaluhu!
Waxaan kugu lahaa oo dhan
waan kuu dhaafay, waayo,
waad i bariday.

Miyaanad lahayn inaad kii kula
shaqayn jiray u naxariisatid sidaan
anigu kuugu naxariistay?



Then the master called the servant in.
'You wicked servant,' he said, 'I canceled all that debt of yours
because you begged me to.
Shouldn't you have had mercy on your fellow
servant just as I had on you?'

Markaasaa

sayidkiisu cadhooday
oo u dhiibay
kuwa dadka silciya
ilaa uu bixiyo
wixii lagu lahaa oo dhan.



In anger his master handed him over to the jailers to be tortured, until he should pay back all he owed.

Sidaas oo kalena ayaa

Aabbahayga jannada ku jiraa
idinku samayn doonaa,
haddaan midkiin
waliba qalbiga
ka cafiyin walaalkiis.



This is how my heavenly Father will treat each of you unless
you forgive your brother or sister from your heart.

Haddaba sidatan u tuko:

Aabbahayaga jannada ku jirow

magacaagu quduus ha ahaado.

Boqortooyadaadu ha timaado,
doonistaada dhulka ha lagu yeelo
sida jannada loogu yeelo.

Kibis maalin nagu filan, maanta na sii.

Oo naga cafi qaamahayaga
sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan.

Oo jirraabadda ha noo kaxayn,
laakiin sharka naga du.

Waayo, boqortooyada iyo xoogga
iyo ammaanta adigaa leh weligaa. *Aamiin.*



This, then, is how you should pray:

Our Father in heaven

hallowed be your name, your kingdom come,
your will be done, on earth as it is in heaven.

Give us today our daily bread.

And forgive us our debts, as we also have forgiven our debtors.
And lead us not into temptation, but deliver us from the evil one.

for yours is the kingdom and the power
and the glory forever. *Amen.*

Wadayo,

haddaad dadka u cafidaan
xumaantooda,
Aabbihiinna jannada ku jira
ayaa idin cafiyi doona.
Laakiin haddaanad dadka cafiyin,
Aabbihiinnu xumaantiinna
idiin cafiyi maayo.

Matayos 6: 9-15

36



For if you forgive other people when they sin against you,
your heavenly Father will also forgive you.
But if you do not forgive others their sins,
your Father will not forgive your sins.

Matthew 6: 9-15

Rabbiyow,

haddaad dembiyada u fiirsatid,
Bal yaa istaagi doona, Sayidow?

Laakiinse waxaa kula jirta
dembidhaafid,
In adiga lagaa
cabsado daraaddeed.

Sabuurka 130: 3,4

38



If you, Lord, kept a record of sins, Lord, who could stand?
But with you there is forgiveness,
so that we can, with reverence, serve you.

Psalm 130: 3,4

Midkiinba midka kale

ha u dulqaato oo ha cafiyo,
haddii mid ka cabanayo mid kale;
xataa sida Rabbiguba idiin cafiyey,
idinkuna sidaas oo kale yeela.

Oo nabadda Masiixuna
ha ku taliso qalbiyadiinna.

Kolosay 3: 13,15

40



Bear with each other and forgive one another
if any of you has a grievance against someone.

Forgive as the Lord forgave you.

Let the peace of Christ rule in your hearts.

Colossians 3: 13,15

©2017: Daabacaadda ugu horeysay - First print

©2017: Qoraal - Text:

Kitaabka Quduuska Ah - www.noloshacusub.net

Bible - www.biblegateway.com - New International Version (NIV)

©2017 Sawiro - Pictures: Designer

Websites:

www.noloshacusub.net

akhbaartawanaagsan.com

Macluumaad intaas ka badan:

Kitaabka Quduuska Ah oo ku qoran af-Soomaali
wuxuu immika diyaar ku yahay telefoonada gacanta
(Smart Phones) ee iPhone, Android...ka soo dejiso halkan:
YouVersion ama xagga App Store -kaaga
[markaas " YouVersion " raadi].

More info:

Bible written in English is now available on
mobile phones (Smart Phones) in the iPhone, Android ...
Download from here: YouVersion